



Qaadashada Tallaalka si Looga hortago Cudurka COVID-19

Tallaalada COVID-19 ee la cusboonaysiiyay 2023-2024 waa kuwo badqab leh, waxtar leh, waxaana lagu taliyey inuu qaato qof walba oo jira 6 billood iyo wixii kasii wayn.

Inta badan dadka da'doodu tahay 5-64 sano waxay u baahan yihiin hal qiyaas oo la cusboonaysiiyay 2023-2024 si ay u helaan difaac buuxa.

- Carruurta 6 billood-4 sano jirka ah waxay u baahan karaan in ka badan hal qiyaas oo ah tallaalka COVID-19 ee la cusboonaysiiyay 2023-2024 si ay helaan difaac buuxa ee COVID-19.
- Dadka waawayn ee jira 65 sano iyo ka wayn waa inay qaataan 2 kuuro oo ah talaalka COVID-19 ee 2023-2024 oo cusub ayadoo loo dhaxeysiinaayo ugu yaraan 4 billood.
- Dadka da'doodu tahay 6 billood iyo ka sii weyn oo difaaca jirkood uu liita ama xaalada halis ah kujiro waxaa looga baahanyahay inay dhammaystiraan 3-qiyaas oo taxane ah oo waxaana laga yaabaa inay helaan qiyaaso dheeraad ah oo la cusboonaysiiyay 2023-2024 ee ugu yaraan 2 billood ka dib markii ay qaateen qiyaaskoodii ugu dambeeyay.

Waa kuwee tallaalka COVID-19 ee hadda la heli karo?

Pfizer-BioNTech/Comirnaty

Nooca 2023-2024, 6 billood iyo ka weyn *

Moderna/Spikevax

Nooca 2023-2024, 6 billood iyo ka weyn *

Novavax

Foomulada 2023-2023, 12 sano iyo ka weyn

**Comirnaty iyo Spikevax waa magacyo summadeed ee tallaalka mRNA ee hadda loo oggolaaday da'da 12 iyo ka weyn. Tallaalka Pfizer iyo Moderna ee mRNA waa tallaalo loo oggolaaday da'da 6 billood iyo ka weyn .*

Badqab ma tahay in la qaato tallaallo kale isla wakhtiga tallaalka COVID-19?

Haa, waa badqab in la qaato tallaalka COVID-19 isla marka aad qaadanayso tallaallada kale. Uma baahnid inaad jadwal u sameysato tallaalada kale ee lagu taliyay si ka gooni ah tallaalka COVID-19. Ballanta tallaalka COVID-19 waa fursad kale oo aad ku heleyso dhammaan tallaalada lagu taliyey.

Immisa qiyaasood ayuu ilmahaygu u baahan yahay si uu heelo difaac buuxo?

Carruurta aan la tallaalin ee 6 bilood-4 sano jir ayaa lagula talinayaa inay qaataan 2 qiyaasood oo cusub oo tallaalka Moderna COVID-19 ah ee 2023-2024 ama 3 qiyaasood oo ah tallaalka Pfizer COVID-19 ee la cusboonaysiiyay ee 2023-2024.

Carruurta horay loo tallaalay ee 6 bilood - 4 sano jirka ah ayaa lagula talinayaa inay qaataan 1 ama 2 qiyaasood ee tallaalka COVID-19 ee cusub ee 2023-2024 ee Moderna ama Pfizer (wakhtiga iyo tirada qiyaasaha la bixiyo waxay ku xirantahay tallaalkii hore loo qaatay ee COVID-19).

Carruurta da'doodu tahay 5 sano iyo wixii ka weyn ayaa helaya difaaca buuxa ee tallaalka COVID-19 haddii ay helaan ugu yaraan 1 kuuro oo ah tallaalka Moderna ama Pfizer COVID-19 ee la cusboonaysiiyay 2023-2024.

Shakhsiyaadka da'doodu tahay 12 sano iyo ka weyn ee aan la tallaalin ayaa u qalmi kara inay qaataan 2 kuuro oo ah tallaalka Novavax COVID-19 ee 2023-2024, kahortag ah, loona dhexaysiiyay 3 asbuuc.

Shakhsiyaadka da'doodu tahay 12 sano iyo ka weyn ee hore loogu tallaalay tallaalka COVID-19 (kuwaas oo aan lagu tallaalin tallaalka mRNA COVID-19 ee dhowaan la cusboonaysiiyay ee 2023-2024) ayaa u qalma qaadashada 1 kuuro oo ah tallaalka Novavax COVID-19 ee 2023-2024, Kahortag ah.

Carruurta da'doodu tahay 6 bilood iyo ka weyn oo difaac jirkood uu liita ama xaalada halis yahay waxaa looga baahanyahay inay dhammaystiraan 3-qiyaas oo taxane ah oo waxaana laga yaabaa inay helaan qiyaaso dheeraad ah oo tallaalka COVID-19 oo la cusboonaysiiyay 2023-2024 ee ugu yaraan 2 bilood ka dib markii ay qaateen qiyaaskoodii ugu dambeeyay.

Si aad dukumiintigaan ugu heshid qaab kale, wac 1800-525-0127. Haddii aad tahay macaamiil dhagool ah ama aad maqal culus tahay, fadlan wac 711 (Washington Relay) ama iimayl udir email civil.rights@doh.wa.gov.

Ma jiraa kharash loogu talagalay tallaalka COVID-19?

Dhammaan carruurta da'doodu tahay 18 jir iyo kuwa ka hooseeya waxay tallaallada COVID-19 ka heli karaan iyagoo isticmaalaya [Childhood Vaccine Program](#) [Childhood Vaccine Program \(Barnaamijka Tallaalka Carruurta\)](#) (Ingiriisi kaliya) ee wax kharash aan loo baahnayn. Haddii aad leedahay caymiska caafimaadka dawliga ah ama mid gaar ah, dhakhtarkaaga adeegga tallaalka ayaa kharash dul saarayo si dib loogu magdhabo khidmadda maamulidda tallaalka.

Dadka qaangaarka ah ee da'doodu tahay 19 sano iyo wixii ka weyn ee caymiska leh ayaa kharasha la'aan ku heli kara tallaalada COVID-19. Sida waafaqsan [Coronavirus Aid, Relief, and Economic Security Act \(CARES Act, Xeerka Caawimaada, Gargaarka, iyo Amniga Dhaqaalaha ee Coronavirus\)](#) (Ingiriisi kaliya), qorshayaasha iyo soosaarayaashu waa inay daboolaan, iyada oo aan kharash loo baahnayn, tallaalka oo COVID-19 ah oo ay ogolaato ama ansixiyo Food and Drug Administration (FDA, Maamulka Cuntada iyo Daawada) isla markaaba marka tallaalku noqdo mid la oggolaaday ama la meel mariyay. Dadka qaangaarka ah ee aan caymiska lahayn iyo kuwa aan caymiskooda uusan tallaalka dabooli karin waxay tallaalka COVID-19 ka heli karaan [Bridge Access Program \(Barnaamijka Helitaanka Fudud\)](#) (Ingiriisi kaliya), kaas oo ay ku jiraan iskaashi lala yeesho farmashiyada Washington oo dhan iyo Bixiyayaasha Tallaalka Dadka Waaweyn ee dheeraad ah. Bridge Access Program ee Centers for Disease Control and Prevention (CDC, Xarumaha Xakamaynta iyo Kahortagga Cudurrada) wuxuu bixiyaa tallaalo COVID-19 oo aan kharash lahayn ee dadka waaweyn ee aan lahayn caymis caafimaad iyo dadka waaweyn ee caymiskoodu aanu daboolin dhammaan kharashyada tallaalka COVID-19. Tallaalada COVID-19 ee aan kharashka lahayn ee barnaamijkan ayaa waxaa la heli karaa ilaa Disembar 31, 2024. Fadlan booqo [vaccines.gov](https://www.vaccines.gov) (Ingiriisi oo keliya) si aah u hesho goobaha ka qayb qaadanay Bridge Access Program .

Xariirka



Covid.Vaccine@doh.wa.gov
360-236-3642

[Tusmada Caafimaadka ee Tallaalka COVID-19 - https://www.cdc.gov/vaccines/covid-19/clinical-considerations/interim-considerations-us.html# covid-vaccines](https://www.cdc.gov/vaccines/covid-19/clinical-considerations/interim-considerations-us.html# covid-vaccines)

[Childhood Vaccine Program - https://doh.wa.gov/public-health-healthcare-providers/public-health-system-resources-and-services/immunization/childhood-vaccine-program](https://doh.wa.gov/public-health-healthcare-providers/public-health-system-resources-and-services/immunization/childhood-vaccine-program)

[CARES Act - https://www.dol.gov/sites/dolgov/files/EBSA/about-ebsa/our-activities/resource-center/faqs/aca-part-50.pdf](https://www.dol.gov/sites/dolgov/files/EBSA/about-ebsa/our-activities/resource-center/faqs/aca-part-50.pdf)

[Bridge Access Program - https://www.cdc.gov/vaccines/programs/bridge/index.html](https://www.cdc.gov/vaccines/programs/bridge/index.html)

[Vaccines.gov - https://www.vaccines.gov/](https://www.vaccines.gov/)